

## **Beddellada/Waafajinaha Macquulka ah Reasonable Modifications/Accommodations**

VTA waxay gargaartaa rakaabka naafada ah ee adeegsanaya adeegyada baska tareenka laydka iyada oo ku samaynaysa beddello macquul ah siyaasadaha hawlgalka, dabbakhaadaha iyo habraacayda marka la codsado iyada oo raacaysa Xeerka u Dambeeya ee Waaxda Gaadiidak Maraykanka 49 CFR Qaybaha 27 iyo 37.

Beddellada macquulka ah waxa kamid noqon kara ka caawinta rakaabka galinta lacagta sanduuqa nooliga, u oggolaanshaha rakaabka inay wax cunaan, cabbaan ama daawo qaataan iyaga oo gaadiidka saaran si looga fogaado dhibaato caafimaad, iyo u oggolaanshaha rakaabka inay si gaar ah gaadiidka u soosaaraan aaladaha ay ku dhaqaaqaan marka rakaabku uu xakamayn karayo dhaqdhaqaqa aaladda.

Rakaabku waxay sii codsan karaan beddello, ama waxay codsan karaan marka ay u baahdaan. Rakaabka loogama baahna inay dhahaan “Beddello Macquul ah” marka ay codsanayaan gargaar. Shaqaalah VTA waxay la shaqayn doonaan rakaabka si ay u helaan qaab kale si loo gargaaro baahiyahooga galaangalka, haddii codsi beddelis siyaasad, dabbakhaad, ama habraac aan la oofin karin.

Si aad u samayso codsi waafajin macquul ah, fadlan la xidhiidh Adeegga Macmiilka VTA.

Adeegga macmiilka:

(408) 321-2300

Macluumaadka is-wada ee jira

24 saacadood ah Ingiriisi iyo Isbaanish

(800) 894-9908 dibadda Degmada Santa Clara

(408) 321-2330 TTY

customer.service@vta.org

Siyaasadda/Habraaca Waafajinta Macquulka ah ee VTA

<b>Gaadiidka Dadka Naafada ah; Siyaasadda VTA ee Beddelka Macquulka ah ee Siyaasadda iyo Habraaca</b>	<b>SIYAASADDA (POLICY)</b>
<b>Transportation for Individuals with Disabilities; VTA Reasonable Modification Policy and Procedure</b>	Lambarka Dokumentiga: OPS-PL-0060
	Lambarka Qaypta: 01

## 1.0 Ujeedada:

Laga bilaabo Luulyo 13, 2015, xukunka u dambeeyaa ee Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah ee Waaxda Gaadiidka ee la xidhiidha Gaadiidka iyo Dadka Naafada ah; Beddelista Macquulka ah ee Siyaasadaha iyo Dabbakhaadaha wuxuu dhigayaa in gaadiidlaydu ay ku sameeyaan beddello macquul ah xukunadooda hawlgalka iyo habraacyada si loo xaqijiyo in adeegyada ay galaangalka u yeelan karaan dadka naafada ah (fiiri *Diiwaanka Fadaraalka /Buugga. 80, No. 49 (80 FR 13253, Maars 13, 2015.* *Goobada Maamulka Gaadiidka Fadaraalka FTA C 4710.1 sidoo kale ku sheegaya xukunka u dambeeyaa §2.10 & §2.11).*

Siyaasaddan waxa kujira xukunada iyo qaynuunada hawlgalka VTA ee xukunka u dambeeyaa ee beddelka macquulka ah ee Xeerka Dadka Maraykanka ah ee Naafada ah ee Waaxda Gaadiidka, iyada oo markaa loo ballaadhinayo galaangal u yeeladka dadka naafada ah ee adeegyada basaska, tareenada laydhka, gaadiidka dadka naafada.

## 2.0 Baaxadda:

VTA iyo qandaraaslayaasheeda ayaa ka masuul ah ku samaynta beddellada/waafajinaha xukunada, siyaasadaha, iyo habraacyada hawlgalka marka loo baahdo ayna habboon tahay in loo oggolaado dadka naafada ah inay isticmaalaan adeegyada baska, tareenka laydhka, gaadiidka meelaha iskaga goosha, ama gaadiidka naafada.

## 3.0 Masuuliyadaha:

3.1 Wadayaasha Basaska, Wadayaasha Tareenka Laydka, Kormeerayaasha Nooliga, Kormeerayaasha Goobta, Ku-xigaanada Ilaalada Gaadiidka, iyo shaqaalaha Nabab-sugidda VTA waxay waajiji karaan tusaalayaasha soo socda ee codsiyo waafajin macquul ah. Liiska ma aha khaas maadaama ay jiri karaan codsiyo kale ee beddellada siyaasadda, xukunka, ama habraaca, aan la saadaalin, kuwaasi oo u baahan doonaa in la gargaaro.

- 3.1.A Kaalmada maaraynta nooliga, marka la codsado, waa in la bixiyo (Buugga Xukunka Wadaha Baska 7.11). *Waduhu waa inaanu laacin boorsada, kiishka, alaabta, ama dharka rakaabka si uu u gaadho lacagta ama nooliga si uu u kaalmeeyo dhiibista nooliga.*
- 3.1.B Rakaabka wax ku cunaya waxna ku cabbaya iyaga oo saaran gaadiidka si looga dheeraado xaadal caafimaad oo gurracan. (Buugga Xukunka Wadaha Baska 8.12; fiiri Sharciga Deegaanka VTA 98.1 Sec 4 (b) 7)
- 3.1.C Rakaabka daawo ku qaadanaya isagoo saaran gaadiidka (Buugga Xukunka Wadaha Baska 8.13). *Waduhu waa inaanu ka kaalmayn rakaabku inuu qaato daawo. Rakaabka ayaa ka masuul ah qubista shayada daawadooda waana*



Taariikhda Hore:	Taariikhda Dib-u-eegista:	Bogga 1 ee 6
8/25/15	Aan khusayn	

<b>Gaadiidka Dadka Naafada ah; Siyaasadda VTA ee Beddelka Macquulka ah ee Siyaasadda iyo Habraaca</b>	<b>SIYAASADDA (POLICY)</b>
<b>Transportation for Individuals with Disabilities; VTA Reasonable Modification Policy and Procedure</b>	Lambarka Dokumentiga: OPS-PL-0060
	Lambarka Qaypta: 01

inayna ku tuurin shayada daawada (waxyaalaha dadka sara/muda, siriijyada, falliiqyada baadhitaanka, daawada, ama wixii kale ee la xidhiidha) gaadiidka dushiisa ama qashin-qub ay leedahay xarunta gaadiidku (kaabadda tareenka laydka, xarunta adeegga macmiilka, xarunta gaadiidka, meesha basku joogsado ama gabbaad).

- 3.1.D Rakaabku waxay baaburka si gaar ah uga raaci karaan aaladaha ay ku dhaqaqaan (Buugga Xukunka Wadaha Baska 8.9.1). *Waduhu waa inaanu kaalmayn shaqada aaladda dhaqdhaqaaqa.*
- 3.1.E Basaska waa in la dhigo meesha basku joogsado ama meel u dhaw si looga dheeraado caqabado marka ay daruuri tahay ama la codsado marka Waduhu uu go'aansado inay ammaan tahay inuu sidaas yeelo (Buugga Xukunka Wadaha Baska 5.16).

Tilmaam dheeraad ah, wadayaashu waa inay la xidhiidhaan Xarunta Maamulka Hawlgallada VTA haddii ayna awoodin inay bixiyaan waafajin la codsaday. Wax diiwaangalin xog oo dheeraad ah looma baahna bixinta beddeloo macquul ah.

### 3.2 Kormeerayaasha Goobta

- 3.2.A Waa inay ka taageeraan Wadayaasha go'aaminta haddii beddello/waafajin macquul ah oo la codsaday la buuxin karo.
- 3.2.B Waa inay la falgalaan rakaabka si ay u hubiyaan inay awoodaan isticmaalka adeegyada VTA iyaga oo adeegsanaya qaadashada go'aano samaynta beddello macquul ah ama go'aaminaya qaabab kale kuwaasi oo bixinaya galaangalka la codsaday.

### 3.3 Adeegga Macmiilka/Shaqaalaha ISR

- 3.2.A Adeegga Macmiilka VTA/Shaqaalaha ISR waa inuu u galo codynada macaamiisha beddello siyaasad, habraac, ama xukun gudaha nidaamka raadraaca jawaabcelinta Adeegga Macmiilka. Codynadan waxa loo aqoonsan Codynado Beddello Macquul ah. Codynada waxa loo wareejin Maaraynta Adeegga Macmiilka/ Kormeerka shaqaalaha.
- 3.2.B Haddii Adeegga Macmiilka VTA/Shaqaalaha ISR uu helo dacwad macmiil oo kusaabsan diidmo codynada beddel siyaasad, habraac, ama xukun intuu isticmaalayo adeegyada VTA, dacwadda waxa la galin doonaa nidaamka raadraaca jawaabcelinta Adeegga Macmiilka waxaana loogu calaamadin diidmo codynada beddel oo macquul ah.

### 3.4 Maaraynta Adeegga Macmiilka



Taariikhda Hore:	Taariikhda Dib-u-eegista:	Bogga 2 ee 6
8/25/15	Aan khusayn	

<b>Gaadiidka Dadka Naafada ah; Siyaasadda VTA ee Beddelka Macquulka ah ee Siyaasadda iyo Habraaca</b>	<b>SIYAASADDA (POLICY)</b>
<b>Transportation for Individuals with Disabilities; VTA Reasonable Modification Policy and Procedure</b>	Lambarka Dokumentiga: OPS-PL-0060
	Lambarka Qaypta: 01

3.4.A Shaqaalaha Maaraynta Adeegga Macmiilka waa inuu u wareejiyo codsiyada macmiilka ee beddelleada siyaasad, habraac, ama xukun shaqaalaha ku habboon ee VTA. Maaraynta Adeegga Macmiilku waxay galin doontaa xalka codsiga xog-kaydinta Adeegga Macmiilka iyada oo laga tilmaan qaadanayo shaqaalaha VTA ee qaabisani.

3.4.B Shaqaalaha Maaraynta Adeegga Macmiilku waa inuu codsadaa fiidyowga weelka xogta CCTV ee diidmada la sheegay ee codsiga beddelka macquulka ah. Warbixinta macmiilka ee diidmada macluumaadka kusaabsan dhacdada weel xogta ee loo jeedo waxa loo wareejin Isu-duwaha VTA ee ADA. Fiidyowga weelka xogta CCTV waxa la codsan karaa ilaa 14 maalmood kadib dhacdada la sheegay iyada oo la dhammaystirayo foomka codsiga Weeka Xogta Adeegyada Ilalineed: <http://thehub.vta.org/divisions/protectiveservices/Documents/Forms>.

### 3.5 Shaqaalaha VTA ee Qaabilsan

Shaqaalaha VTA ee qaabilsan wuxuu haysan doonaa 14 maalmood laga bilaabo taariikhda codsiga si uu u qaato go'aan la xidhiidha codsiga macmiilka.

3.5.A Haddii codsiga la ansixiyo, macaamiisha waxa loogu sheegi qoraal.

3.5.B Haddii codsiga la diido, xubinta shaqaalaha ee go'aanka qaadatay ayaa qoraal ku bixin doonta, sababta diidmada oo bixin doonta wax kale oo beddela, hadday suurogal tahay.

3.5.C Haddii macmiilku khilafo diidmada ama waxa loogu beddelay ee loo soo bandhigay, macmiilku rafcaan ayuu qaadan karaa. Ogaysiska diimada VTA waxa kujiri doona lambarka tixraaca macmiilka iyo talo macmiilka loogu sheegayo inuu haysto 21 maalmood laga bilaabo taariikhda ogaysiska diidmada si uu rafcaan ugu qaado Isu-duwaha VTA ee ADA, kaasi oo qoran ama inuu waco xarunta adeegga macmiilka. Macaamiishu waa inay isticmaalaan lambarkooda tixraaca markay fayl garaysanayaan rafcaan.

### 3.6 Isu-duwaha ADA

Isu-duwaha ADA wuxuu dib-u-eegi doonaa rafcaanka macmiilka wuxuuna ugu diyaarin doonaa bushqad Guddida Dib-u-eegista Rafcaanada si ay eegaan. Bushqadda rafcaanku waxay ka kooban tahay guudmarka waafajinta la codsaday, sababaha keenay in waafajinta la codsaday la diido, rafcaanka macmiilka, xukunnada VTA ee ku tacaluqa, ra'yiga Wadaha/Kormeerayaasha Goobta ee ku lug lahaa, iyo nuql wixii fiidyow weelka xogta ee dhacdada la sheegay.

ARC waxay ka kooban tahay 3 xubnood oo ka socda waaxaha soo socda:

3.6.A Isu-duwaha ADA, ama wakiilkiisa



Taariikhda Hore:	Taariikhda Dib-u-eegista:	Bogga 3 ee 6
8/25/15	Aan khusayn	

<b>Gaadiidka Dadka Naafada ah; Siyaasadda VTA ee Beddelka Macquulka ah ee Siyaasadda iyo Habraaca</b>	<b>SIYAASADDA (POLICY)</b>
<b>Transportation for Individuals with Disabilities; VTA Reasonable Modification Policy and Procedure</b>	Lambarka Dokumentiga: OPS-PL-0060
	Lambarka Qaybta: 01

- 3.6.B Khabuur Takhasus u Leh Arrinka (shaqaale aan ku lug lahayn go'aanka hore ee lagu diiday codsiga beddelka)  
 3.6.C Adeegga Macmiilka

Xubno ayey la tashan doonaan xubnaha ARC, haddii loo baahdo, si ay dib ugu eegaan ugana talobixiyaan xal codsiga diibmada codsiga Beddelka/Waafajinta Macquulka ah.

Guddida Dib-u-eegista Rafcaanadu waxay qoraal ku jawaabi doontaa 21 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda rafcaanka. Haddii diidmada la beddelo, ARC waxay ugu jawaabi qoraal macmiilka kaasi oo loogu sharxayo go'aankooda. Haddii diidmada la taageero, ARC waxay qoraal ku siin, sharraxaad faahfaahsan oo kusaabsan sababta waafajinta aan loo samayn karin. Qaab kale oo loo gaadhayo adeegga ay ku dabajirtay waafajinta la codsaday ayaa lagula talin karaa macmiilka. Go'aanka ay qaataan ARC waa kama-dambays.

Dhammaan macluumaadka la xidhiidha codsiyada macmiilka ee beddellada macquulka ah iyo rafcaanada waxa la galin doonaa nidaamka raadraaca jawaabcelinta Adeegga Macmiilka.

#### **4.0 Siyaasadda:**

VTA waxay ku samayn beddello/waafajino macquul ah siyaasadaheega, dabbakhaadaha iyo habraacyada hawlgalkeeda si ay u caawiso hubinta in adeegyada gaadiidka ay heli karaan rakaabka oo dhan.

In kastoo hay'adaha gaadiidka aan looga baahnayn inay sameeyaan beddello loo tixgaliyo inayna macquul ahayn, xukunka kama-dambaysta ah wuxuu ku waajib yeelayaan inay la shaqeeyaan macaamiisha si ay u helaan siyaalo kale oo macquul ah.

Marka codsi beddello/waafajino lagu samaynayo siyaasadda, dabbakhaadda, ama habraaca la go'aamiyo inaanay ahayn macquul, VTA waxay la shaqayn macmiilka codsanaya, ama wakiilkiisa, si loo helo dib-u-habayn siyaasad, dabbakhaad, ama habraac oo kale si loogu oggolaado macmiilka inuu isticmaalo adeegyada gaadiidka VTA.

Waxa soo socdaa waa liis codsiyada waafajinta taasi oo USDOT ay u aqoonsatay inay tahay mid aan macquul ahayn. Wadayaasha gaadiidka loogama baahnai nay bixiyaan waafajinahan.

Liiskan ma aha khaas maadaama ay jiri jiraan habab kale, oon la ogayn, kuwaasi oon la gargaari karin.



Taariikhda Hore:	Taariikhda Dib-u-eegista:	Bogga 4 ee 6
8/25/15	Aan khusayn	

<b>Gaadiidka Dadka Naafada ah; Siyaasadda VTA ee Beddelka Macquulka ah ee Siyaasadda iyo Habraaca</b>	<b>SIYAASADDA (POLICY)</b>
<b>Transportation for Individuals with Disabilities; VTA Reasonable Modification Policy and Procedure</b>	Lambarka Dokumentiga: OPS-PL-0060
	Lambarka Qaybta: 01

- 4.1 Kaalmada Kaaliyaha Daryeelka Qofka ee wade
- 4.2 Kaalmada alaabta iyo bushqadaha
- 4.3 Nooli qaadista wadaha, ama bixin-waaga
- 4.4 Daryeelka wadaha ee xayawaanka adeega
- 4.5 Waxyaalaha rakaabku gacanta ku sitaan
- 4.6 Sifooinka gaadiidka ama qalabka gaarkak ah ee gaadiidka
- 4.7 Safarka gaadiidka naafada ee khaaska ah ama mugga ya dhimay (qofka kaliya)
- 4.8 Safarrada Gaadiidka Naafada ADA ee ka baxsan mandaqadda adeegga ama saacadaha shaqada
- 4.9 Joogsiga iyo ku sugista meel dhexe inta lagu jiro safarka gaadiidka naafada ADA
- 4.10 Codsi ku abuuraya halis gaadiidka, wadaha, ama rakaabka kale
- 4.11 Codsi ku aaddan dirawal khaas ah
- 4.12 Codsi inay ka fogaadaan rakaabka kale ee safarka gaadiidka naafada ADA

## 5.0 **Shuruudaha Tabobarka:**

Iyada oo laga tilmaan qaadanayo Waaxda VTA ee Tabobarka iyo Horumarka Shaqaalaha, maamulku wuxuu ka masuul noqon doonaa ku tabobaridda shaqaalahooga sida loogu jawaabo codsiyada macmiilka ee beddello/waafajino macquul ah. Tabobar ayaa la siin doonaa shaqaalaha marka u horraysa iyo si joogto ah.

- 5.1 Wadayaasha Baska iyo Tareenka Laydhka waxa la tabobari doonaa inta lagu jiro tabobaka bilawga iyo fasallada muraajicada tabobarka farsameed ee xiga.
- 5.2 Kormeerayaasha Goobta, Maamulayaasha Guud, iyo Shaqaalaha Raadiyawgu waxay heli doonaan tabobar bilawga oo kusaabsan qaynuunka beddellada/waafajinta macquulka ah. Tabobar muraajico oo la qabto muddadiiba mar, marka loo baahdo, ayaa la siin doonaa shaqaalaha Hawlgallada.
- 5.3 Kormeerayaasha Nooliga iyo Ku-xigeenada Ilaalada Gaadiidku waxay heli doonaan tabobar bilawga kusaabsan qaynuunka beddellada/waafajinta macquulka ah. Tabobar muraajico oo la qabto muddadiiba mar, marka loo baahdo, ayaa la siin doonaa shaqaalaha Hawlgallada sida ay ku talogashay maaraynta Adeegyada Ilaalineed.
- 5.4 Shaqaalaha Adeegga Macmiilka ayaa heli doona tabobar bilawga kusaabsan qaynuunka beddellada/waafajinta macquulka ah. Tabobar muraajico oo la qabto muddadiiba mar, marka loo baahdo, ayaa la siin doonaa maamulka Adeegga Macmiilka.



Taariikhda Hore:	Taariikhda Dib-u-eegista:	Bogga 5 ee 6
8/25/15	Aan khusayn	

<b>Gaadiidka Dadka Naafada ah; Siyaasadda VTA ee Beddelka Macquulka ah ee Siyaasadda iyo Habraaca</b>	<b>SIYAASADDA (POLICY)</b>
<b>Transportation for Individuals with Disabilities; VTA Reasonable Modification Policy and Procedure</b>	Lambarka Dokumentiga: OPS-PL-0060
	Lambarka Qaypta: 01

5.5 Isu-duwaha ADA wuxuu la shaqayn doonaa maamulka Adeegga Macmiilka iyo shaqaalaha Hawlgallada ee loogu talogalay si loo hubiyo in xubnaha Guiddida Dib-u-eegista Rafcaanka loo sheegay macluumaadka kusaabsan habka dacwadda iyo dib-u-eegista rafcaanka beddellada/waafajinta macquulka ah.

#### **6.0 Qeexdimaha:**

- 6.1 *Beddel/Waafajin Macquul ah* Isbeddel lagu sameeyo siyaasadda, dabbakhaadda, ama habraaca hawlgalka si awood loogu siiyo dadka naafada ah inay isticmaalaan gaadiidka dadwaynaha.
- 6.2 *Beddel/Waafajin Aan Macquul Ahayn* Isbeddel lagu sameeyo siyaasadda, dabbakhaadda, ama habraaca hawlgalka kaasi oo khatar u leh wadaha ama dadka kale, daruuri ma aha si loo helo adeegga, waa culays, waxaanu aad ah u beddeli nooca adeegga.

#### **7.0 Guudmarka Isbeddellada:**

Fasaxa bilawga ee siyaasaddan.

#### **8.0 Macluumaadka Ansixinta:**

Diyaariyey:	Dib-u-eegay:	Ansixiyey
David Ledwitz Falanqeeye Maaraynta Qorshaynta Adeegga & Hawlgallada (Management Analyst Service & Operations Planning)	~saxeexay	~saxeexay
Camille C. Williams Maareeyaha Barnaamijka Adeegyo la Isitcmaali karo/ Maareeyaha Mashruuca Title VI (Accessible Services Program Manager/ Title VI Project Manager)	Inez Evans, Sarkalka Madaxa Hawlgalka(Chief Operating Officer)	Nuria I. Fernandez Maareeyaha Guud (General Manager)



Taariikhda Hore:	Taariikhda Dib-u-eegista:	Bogga 6 ee 6
8/25/15	Aan khusayn	